



# ELECT SHUKRI

KING COUNTY COUNCIL • DIST 5



"Bulshooyinkeenna kala duwan ee Degmada South King County waxay mudan yihiin in ay metelaad dhab ah ku yeeshaan Golaha Degaanka ee Degmada King County. Waxaan si wada jir ah, u abuuri doonnaa jawi gees walba oo degmadeenna ka mid ahi ku kobci karo, iyadoo mudnaanaha ay bulshadeenna abuurtayna ay ka dhex muuqdaan dowladdeena. Haddii la i doorto, codkayga oo keliya ma ahan waxa aan ku biirrin doonna Golaha Degaanka ee Degmada King. Kaagana waan ku biirrin doonnaa. Waxay noqon doonnaan codadka dhammaan dadka degaanka deggan ee doonaya in codkooda la maqlo oo lagu qiimeeyo dimuqraadiyadeenna."

## KU SAABSAN SHUKRI

Dr. Shukri Colow waa hooyo, bulsho abaabule, aqoonyahan, iyo musharrax u taagan Golaha Degaanka Degmada King, Degmada 5aad (taas oo ka kooban magaalooyinka Kent, SeaTac, Tukwila, Burien, Normandy Park, Des Moines iyo Renton). Maadaama ay tahay qof soo haajiray, qaxooti soo noqday oo ka soo noolaaguryaha dowladda ee Kent, Shukri waxay ka mid tahay bulshadan. Waxay ku soo noolayd caqabadaha ay haatan la kulmayaan xubno badan oo bulshadeenna ka tirsan, waxayna dareentay quruxda ay leedahay bulshadan taageertay markii ay aad ugu baahnayd taageeradooda.

Muddo 14 sanno ah, Shukri ayaa waxaay u adeegaysay isla bulshadii taageertay - iyadoo qoysaska ku xiraysa kheyraadyada nololaha wax-ka-beddelaya sida guryaha dadweynaha, daryeelka carruurta la awoodi karo, waxbarashada, iyo daryeelka caafimaadka. Dr. Colow ayaa u tartamaysa sidii ay u keeni lahayd waayo-aragnimadeeda ku saleysan nololaha, xirfadda, iyo bulshada ee adag Golaha Degaanka ee Degmada King.

## MAXAY TAHAY SABABTA AY UGU TARTAMAYSO GOLAHA DEGAANKA EE DEGMADA KING?

Laanta sharci-dejinta dowladda hoose ee ugu weyn Gobolka Washington ahaan, Golaha Degaanka ee Degmada King ayaa dejiya siyaasadaha muhiimaha ah, ansaxiya sharciyada, wuxuunna qaataa go'aamada miisaaniyadda ee la xiriira:

- Nidaamka cadaaladda iyo garsoorka, meel ku haynta ciyaalka rabshadaha sameeya, iyo maxkamadaha
- Caafimaadka dadweynaha iyo adeegyada aadanaha
- Nidaamka basaska Metro Transit iyo waddooyinka degmada
- Beeraha nasashada ee gobolka iyo meelaha bannaan
- Daaweynta biyaha wasakhaysan iyo maareynta qashinka
- Doorashooyinka, diiwaannada, iyo shati-bixinta

**5-TA DERIS EE AY DEGMADDEENNA LEEDAHAY AYAA HADLAY  
WAXAA LA JOOGAA WAQTIGII LA HELI LAHAA HOGGAAN CUSUB OO WAAYO-  
ARAGNIMO NOLOLEED LEH**

[WWW.ELECTSHUKRILOW.COM](http://WWW.ELECTSHUKRILOW.COM)

PAID FOR BY SHUKRI OLOW FOR KING COUNTY COUNCIL, DISTRICT 5 • PO BOX 6342 • KENT, WA 98064

# MUDNAANAHA AY BULSHADU-ABUURTO

## Xasaradaha Guryaha iyo Hoy La'aanta

- Gurigu waa xuquuq aadane. Waa in aan si degdeg ah wax uga qabanaa maalgelinta iyo dhisidda ugu yaraan 37,000 qaybood ee loo baahan yahay oo ah guryo la awoodo karo iyo guryo joogto ah oo taageero leh.
- Ilaalinta xuquuqaha aadanaha dadka ay haysato dhibaataada hoy la'aanta. Maalgelinta hoy aan dadka ku badnayn, insaanayad leh oo beddel ammaan ah oo sugan u noqon kara dadka derbi jiiifka ah.
- Xoojinta ilaalinta kiraystaha iyo qofka guriga ijaarka ugu jira si looga hortaggo guri ka saaridda, oo ah sabab ugu weyn ee keenta hoy la'aanta, oo si aan la aqbali karin u saameynaysa qoysaska BIPOC.

## Dib ugu fikiridda bedqabka dadweynaha iyadoo loo marayo aragtiyada caafimaadka dadweynaha

- Hoggaaminta qaab baxnaano leh oo ku saleysan adeegyo dhammeystiran oo dhan walba taabanaya, taageeridda waxyaabaha kale ee beddeli kara xabsi dhigista ee jira, iyo kordhinta maalgashiyada ee lacagaha uu qofka shaqeysta ee ku filan in uu ku noolaado oo keliya, shaqooyinka bulshada.
- Dib-u-maalgelinta nidaamyada bulshada ku saleysan iyo maalgelinta adeegyada bulshada ee kor ku xusan.
- Sameyntakormeerka ama la-socodka bulshada ee hay'adda sharci fulinta oo si dhab ah u madax-bannaan, iyo hubinta in sarkaalka xiga ee loo dooran doonna sugidda amniga (Sheriff) in ay ka go'an tahay la-dagaallanka cunsuriyadda, waxayna u baahan doontaa tababar ka dhan ah eexashada, iyo xasillinta oo loogu talagalay saraakiisha oo dhan.

## Caafimaadka dadweynaha iyo adeegyada aadanaha

- Kordhinta heerarka tallaalka COVID-19 ee Degmada 5aad iyadoo loo marayo iskaashi lala yeelanayo la-hawlgalayaasha bulshada ee dhaqan ahaanta kartida u leh.
- Ballaarinta Xeerka Daryeelka Muddada-dheer ee gobolka si loo kordhiyo guryaha la awoodi karo, daryeelka caafimaadka, iyo adeegyada kale ee loogu talagalay daryeelayaasha qoyska, dadka waaweyn, iyo dadka naafada ah.
- In laga dhigo daryeelka carruurta mid ay awoodi karaan oo ayna heli karaan qoysaska heerarka dakhligooda kala duwan yahay iyadoo la kordhinayo tirada boosaska la heli karo korna loo qaadayo heerarka kaalmada kabka ah.

## Taageeridda Ganacsiyada Koonfurta Degmada King

- Mudnaansiinta gaarista loo siman yahay ee Ganacsiyada Ay Iska Leeyihiin Haweenka iyo Dadka Laga Tiro Badan Yahay si loo fahmo sida hoos u dhaca dhaqaale ee COVID-19 uu u saameeyay, iyo sida Degmada King ay wax uga qaban karto sinnaan la'aantan.
- Ballaarinta Ballanqaadka Degmada King iyadoo la maalgalinayo waxbarashada iyo sanduuqyada tababarka cagaaran ee loogu talagalay ganacsiyada, dhismaha, iyo barnaamijyada gacanyarenimo ku shaqeynta si kor loogu qaado xirfadaha shaqaalaha oo dhan.

## WAXAA SI FARXAD LEH U TAAGEERAY:

- King County Democrats
- 11th, 34th, and 37th LD Democrats
- WA Housing Alliance Action Fund
- SEIU Locals 775, 925, & 1199NW
- One America Votes
- Progreso: Latino Progress
- Sen. Mona Das (47th LD)
- Rep. David Hackney (11th LD)
- Rep. Debra Entenman (47th LD)
- Tukwila City Councilmember Cynthia Delostrinos-Johnson
- Burien Deputy Mayor Krystal Marx

**IYO BULSHADA IN KA BADAN 150 TAAGEERAYAAL**